

## ARIN

Maahmaah horoo oranaysa ‘Xaafad baa cunug korisa’ ayaa soo rumoobaysa maadaama intay qoysasku la halgamayaan kharashka badan eek u kaca korinta hal cunug. Qoysas badan kharashka ugu badani waxa uu uga baxaa xanaano caruur, ijaarka guriga ka dib. Ijaarka dhex dhexaadka ah ee Canada ku baxa xanaanaynta cunug muluq ah waa \$761, \$701 midka saan qaadka ah iyo \$674 caruurta aan weli da’da dugsiyada gaarin.

## XAALAD

Ijaarkaas sare waxaa sii dheer, inayba adag tahay in la helo xanaano caruur si kastoo uu dakhligu yahayba. Canada waxay u sharciyeysay boos xanaano caruur in ka yar afar udhig dhig dhammaan caruurta ay da’doodu u dhexayso 0-5 sanadood, iyo boos la siiyo shan u dhig dhig keliya kuwa ay da’doodu u dhexayso 0-12 sanadood.

Baahida ka sokow, Canada ma lahan barnaamij xanaano caruur oo heer qaran ah. Dawladda federaalka waxay bixisaa lacag caddaan ah oo ay ku taageerto waalidka oo lagu magacaabo Xanaanada Caruur ee Caalamiga ah

Faa’iidada (UCCB). Laakiin ka sokow kordhinta UCCB loo qorsheeyey sanadkaan, waalidku waxay cunug wlaba oo ka yar 6 jir ku heli doonaan \$1,920 oo keliya. Taasina ma dabooli karto xattaa rubuc ka mid ah baahida loo qabo xanaanada cunuggaas. Xattaa lacag caddaan ma damaano qaadi karto inaan haysano sharciyeyn kaafisa helitaanka boosas xanaano caruureedka loo baahan yahay.

Tobaanka kun ee caruur ah ee ku jirta liiska sugayaasha xanaano caruur ee la awoodi karayo iyo qoysaska la halgamaya siday beeshooda uga dhex heli lahaayeen xanaano caruur ee nuxur leh, waxay caddayn u tahay baahida loo qabo xanaano caruur oo heer qaran ah. Xaqiijinta inay waalidku haleelaan xanaano caruur oo joogto ah, la awoodo, ammaan ah, qaayo leh waxay ka taageeraysaa qoysaska iyo waalidiinta caruurta inay ku guulaystaan horukacooda dambe. Qiimo sare, sharciyeyn xanaano caruur waa danta reer Canada oo dhan.

% caruurta u dhexaysa 0-12 jir ee ay wilaayadi u sharciyeeyey boosas xanaano caruur -2012



Source: Ferns & Friendly 2012

## SU’AALO

1. Sidee buu xisbigaagu u hor istaagayaa qaalinimada xanaano caruur iyo helitaan la’aanta boosas xanaano la kabo?
2. Xisbigaagu ma keenayaa nidaam waxbarashada asaasiga ah iyo xanaano caruur oo la wada heli karo?

## ILO:

Faah faahin dheeri ah iyo warqado xaqiiqo siyaado ah ee taxan:  
<http://spno.ca/canada-votes-2015>

Translated by: African Canadian Social Development Council (ACSDC)



THIS SERIES WAS PRODUCED BY: Canadian Council on Social Development, Community Development Council Durham, Community Development Halton, Edmonton Social Planning Council, Saint John Human Development Council, Social Planning and Research Council of BC, Social Planning and Research Council of Hamilton, Social Planning Council of Cambridge and North Dumfries, Social Planning Council of Kitchener-Waterloo, Social Planning Network of Ontario, and Social Planning Toronto.

ELECTION DAY: OCTOBER 19, 2015